



**JUMHURIYADDA FEDERAALKA  
SOOMAALIYA**

**GOLAHA SHACABKA**

**QARAAR KU SAABSAN**

**DHAARINTA IYO DEEQAHU UU XAQ U  
YEELANAYO MADAXWEYNIHII 8-AAD EE  
SOOMAALIYA  
M.NE XASAN SHEEKH MAXAMUUD**

A handwritten signature in black ink, appearing to read "M. Ne Xasan Sheekh Maxamuud".

Muqdisho, 4<sup>ta</sup> Maarsa 2017

## GOLAH SHACABKA SOOMAALIYA

- Markuu arkay:** Qodobka 89-aad ee Dastuurka Federaalka;
- Markuu arkay:** Qodobka 19-aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka iyo Qodobka 4-aad ee Xeer Hoosaadka kmg ee Doorashada Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
- Markuu Dhageystay:** Hadaljeedinta Musharraxiinta ay aragtidooda iyo barnaamijkooda ku soo bandhigeen kana jeediyeen Labada Gole ee BFS hortiisa,
- Markuu Arkay:** Natijada lagu soo gunaanaday Geeddisocodka doorashadii Madaxweynaha 9-aad ee Jumhuuriyadda Soomaaliya oo la qabtay 8<sup>dii</sup> Febraayo 2017.
- Markuu Arkay:** Warbixinta Guddiga Baarlamaanka FS uga xilsaaran Doorashada Madaxweynaha JFS.
- Markuu Arkay:** Warbixinta ku taariikheysan 12/2/2017 ee Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka oo goobjooge ka ahaa Doorashada Madaxweynaha JFS oo caddeeyey in nidaamka lagu maamulay doorashadan yahay mid waafaqsan sida uu farmay Dastuurka Federaalka.
- Markuu Arkay:** Warbixinta Guddiga Ilaalinta Bedqabka Geeddisocodka iyo Anshax Wanaagga oo hubiyey in habraaca lagu hirgeliyey Geeddisocodka Doorashada Madaxweynuhu yahay mid ka bedqaba wax shaki ah, kuna fulay daahfurnaan ka maran welwelladii ay muujiyeen iyo wararkii doorashada ka hor ka soo yeeray meelo qaarkood caalami ah iyo kuwo dalka gudahiisaba laga waayey.
- Asaga oo ku kalsoon:** In 8<sup>dii</sup> Febraayo 2017 Xildhibaannada Baarlamaanka Federaalku ayagoo isku kalsoon ay si xor ah oo cabsi ka maran u codeeyeen kana tarjumeen rabitaanka Shacabka Soomaaliyeed.

**Qaraar**  
**Golaha Shacabka Soomaaliya**  
**Qodobka 1-aad:**

1. Baarlamaanka Federaalka wuxuu si maamuus leh u soo dhoweynaya Madaxweynihii 8-aad ee Soomaaliya M.ne Xasan Sheekh Maxamuud oo muddada xilhayntii loo doortay si buuxda u soo dhamaystiray xilkana banneeyey 8<sup>dii</sup> Febraayo 2017.
2. M.ne Xasan Sheekh Maxamuud wuxuu noqonaya Xildhibaan Golaha Shacabka Soomaaliya inta uu nool yahay xilkana loo dhaariyey 04/03/2017 si waafaqsan Qodobka 64-aad Faqradiisa 4-aad ee Dastuurka Federaalka. Saa daraadeed tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka waa Laba Boqol Toddobaatan iyo Lix (276) Xildhibaan.

**Qodobka 2-aad:**

Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxaa la faraya in Gunno bileedka iyo deeqaha kale uu maamuus ahaan xaq u yeelanayo Madaxweynihii hore Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya M.ne Xasan Sheekh Maxamuud ku fuliyaan qaraarka Golaha Wasiirada lagu meel mariyo Xeer Madaxweyne.

**Qodobka 3-aad:**

Qaraarkani wuxuuna hirgelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaan lagu soo saaraya Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawhar"  
 Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya

